

Macluumaad ku sabsan aragti ururinta iskuulka ee qofka masuulka ilmaha

Salaam,

Hadda waxa la soo gaadhey xiligii aragti ururinta iskuulka. Aragti ururinta iskuulka waxa uu ku socdaa waalidiinta/masuulka ilmaha, ardeyda iyo shaqaalaha macalimiinta.

Sahankaan waxaa laga jawaabi karaa laga bilaabo 2023-01-23 ilaa 2023-02-24.

Dhamaan carruurta iyo da'yarta ayaa xaq u leh waxbarasho wanaagsan oo bay'ad sugan ay ku helaan. Hay'ada kormeerada iskuulada waa qeyb ka mid ah hay'adaha dawlada iyadoo ay shaqadeedu tahay inay baadhitaano ku sameyso si ay u hubiso in dhamaan dugsiyadu ay shuruudahaas buuxinayaan. Natijada aragti ururinta waxaa weeye qeyb muhiim ah oo ka mid ah kormeerka hay'ada iskuulada kaas oo lagu horumarinaayo iskuulada iyo natijadooda. Natijada waxa lagu soo habeynaaya shaxda tirakoobka iyadoo loo diraayo adeega macluumaadka waalidiinta iyo ardeyda ee hay'ada iskuulada.

Adiga ah qofka masuulka ilmaha dhigta xaddaanada, iskuulka hoose iyo iskuulka gaarka ayaa haysta fursad aad fikradaada iskuulka ku sheegto aragti ururinta iskuulka. Aragti ururinta iskuulka waxa lagaga jawaabayaa internedka iyadoo qaadanaaya ilaa toban daqiiqo. Haddii aad leedahay wax ka badan hal ilme oo iskuulka dhigta ayaad aragti ururinta iskuulka uga jawaabaysaa ilme kasta hal mar. Natijada waxa la soo bandhigayaa iyadoo la isku soo ururiyey iyadoo aan loo soo bandhigey si lagu soo saari karo dadka ka qeyb qalay dhibaato u keeni karta. Jawaabta aragti ururinta waxa maareynaaya Hay'ada iskuulada ee ma'aha iskuulka.

Aragti ururinta iskuulka waxa xataa ka jawaabaaya shaqaalaha macalimiinta, ardeyda fasalka 5 iyo 8 iyo gemnasetka fasalkiisa 2. Ardeydu waxay aragti ururinta ka jawaabeyaan xiliga iskuulka ay joogaan. Haddii aad leedahay ilme dhigta fasalka 5-aad ama 8-aad oo aanad rabin in ilmahaagu aanu ka jawaabin aragti ururinta ayaad u baahantey inaad iskuulka taas ogaysiiso.

Sidan ayaad uga jawaabeysaa aragti ururinta:

1. Riix linkiga soo socda www.skolinspektionen.se/skolenkaten
2. Masuulada lehj carruurta dhigata dugsiyada hoose ama dugsiyada hoose ee gaar ah: Riix " föräldrar/vårdnadshavare med barn i förskoleklass, grundskola eller grundsärskola" Ka jawaab sahankaan laga bilaabo 2023-01-23 ilaa 2023-02-24.

3. Ku qor lambarkaaga sirta kaas oo ku dhigan xagga midig ee warqadan macluumaadka ee aad ka heshay iskuulka ilmahaaga

Haddii aad qabto ku sabsan koodhka iyo macluumaadka aad ku soo galayso la xidhiidh Origo Group iyo telefoonka 013-465 61 00 ama skolenkaten@origogroup.com. Haddii aad qabto su'aalo kale oo ku sabsan Aragti ururinta ayaad si diiran noogula soo xidhiidhi kartaa kartaa anaga adigoo khadka telefoonka ee Hay'ada kormeerka iskuulada isticmaalaaya 08-586 080 00 ama emaylka skolenkaten@skolinspektionen.se.

Wixii macluumaad ah ee ku sabsan Hay'ada kormeerka iskuulada aad www.skolinspektionen.se/skolenkaten.

Waad ku mahadsan tahay intaad wakhtiga galisey si aad uga jawaabto aragti ururinta. Waxa anaga muhiim noo ah inaanu ogaano sidaad u aragto iskuulka/carruurtaada ilmahaaga!Tack

Waad mahadsantey,
Kormeerka iskuulada